

**GUDDIGA AMNIGA MACAAMIILKA MINNESOTA
FOOMKA SHEEGASHADA**

Minnesota Judicial Center, Suite 105
25 Rev. Dr. Martin Luther King Jr. Blvd.
St. Paul, MN 55155
(651) 296-3952

Lambarka lacag la'aanta ah oo ah 1-800-657-3601

Fakis (651) 297-5801

TTY Lambarka lacag la'aanta ah oo ah 1-800-627-3529

Haddii aad qabtid naafanimo ama aad u baahan tahay in qabanqaabo gaar ah lagu sameeyo, fadlan la xiriir csbgeneral@courts.state.mn.us ama lambarka 651-296-3952. Dhammaan codsiyada gaarka si taxaddar leh ayaa loo eegi doonaa waxaana laga yaabaa inay ku lug yeeshaan wadahal dhexmara qofka codsiga sameynaya iyo Guddiga Amniga Macaamiilka Minnesota si loo go'aamiyo xalka ugu fiican. Haddii aad aaminsan tahay in lagaa hor istaagay inaad ka qayqaadato, ama lagu diiday dheefaha, adeegyo kasta oo ay bixiyaan Guddiga Amniga Macaamiilka maadaama aad tahay qof naafo ah, fadlan booqo www.mncourts.gov/ADAaccommodation.aspx si aad u hesho xog ku saabsan sida loo soo gudbiyo foomka Cabashada ADA.

Fadlan si dhamaystiran uga jawaab su'aalaha inta aad awoodo kadibna nala wadaag nuqulada dukumentiyada aad aaminsan tahay inay taageerayaan dacwadaada. Haddii ay ku soo wajahaan su'aalo inta aad buuxinayso foomkan, fadlan ka fiiri Su'aalaha Inta Badan Nala weydiiyo ee laga heli karo websaydka ama ka soo wac Xafiiskeena lambarka 651-296-3952. "Adiga" waxaa looga jeedaa Macmiilka. Dadka kale way soo gudbin karaan dacwad haddii ay lacagta siiyeen Qareenka ayagoo matalaya qof kale.

1.a. Adiga kugu saabsan – Macmiilka Qareenka

Magaca Koobaad: _____ Magaca Awoowga:

Cinwaanka:

Magaalo, Gobal, Zip Koodh:

Lambarka Taleefanka:

Iimayl: _____

Waxaa la igala soo xiriir karaa: Iimayl Boosto Talefan

Ma u baahan tahay turjumaan? Hadday haa tahay, waa tee luqaddaas?

* Ogsoonow: Haddii dacwadan qareen uu kugu matalayo, fariimaha dhan waxaa loo diri doonaa qareenkaaga. Fadlan halkan nagula wadaag magaca, ciwaanka, talefan lambarka iyo iimaylka qareenkaaga:

1.b. Adiga kugu saabsan - Dacwoodaha aan Macmiilka Ahayn

Magaca Koobaad: _____ Magaca Awoowga:

Cinwaanka:

Cinwaanka Leenka 2:

Magaalo, Gobal, Zip Koodh:

Lambarka Taleefanka:

Iimayl: _____

Waxaa la igala soo xiriir karaa: Iimayl Boosto Talefan

Ma u baahan tahay turjumaan? Hadday haa tahay, waa tee luqaddaas?

* Ogsoonow: Haddii dacwadan qareen uu kugu matalayo, fariimaha dhan waxaa loo diri doonaa qareenkaaga. Fadlan halkan nagula wadaag magaca, ciwaanka, talefan lambarka iyo iimaylka qareenkaaga:

2. Ku saabsan qareenka kaas oo si aan daacadnimo lahayn kaaga qaatay lacagtaada ama hantidaada.

Magaca Koobaad: _____ Magaca Awoowga:

Cinwaanka:

Cinwaanka Leenka 2:

Magaalo, Gobal, Zip Koodh:

Lambarka Taleefanka:

Iimayl: _____

3. Lacag ama hanti ayaan waayay maadaama qareenku uu iska haystay:

- Kharashaadkii qareenka ayaan bixiyay isagoo aanan wax shaqo ah iigu qabanin kiiskayga
- Kharashaadka aan siiyay qareenka (aana la isticmaalin)
- Lacagta aan bixiyay dhamaadka kiiska
- Lacagihii maalgelinta
- Lacagtii uu qareenka ii hayay
- Lacagihii deynta
- Lacag kale:

4. Meeqa lacag/hanti ah ayay daacadnimo darada qareenka kugu sababay inaad khasaarto? Sideed u xisaabisay wadartan?

5. Goormee ayaad ogaatay daacadnimo darada qareenka? (Goorma ayuu khasaaraha dhacay?)

6. Sharax habdhaqanka aan daacada ahayn ee qareenku kugu sameeyay.

6.a. Haddii aad qareenka lacag u siisay inuu kuu qabto adeegyo sharci:

Ma waxay ahayd kiis maxkamadeed? Ku dar lambarka galka maxkamadda:

Goorma ayaad shaqaaleysiisay qareenka, maxaadna u shaqaaleysiisay inuu kuu qabto?

Sharax waxa uu qareenka kuu qabtay/waxa uusan kuu qabanin?

Qareenka makala saxiixateen heshiis qoran? (Haddii ay tahay haa, fadlan ku soo lifaaq nuqul.)

6.b. Haddii aadan lacag ku siinin qareenka inuu kuu qabto adeegyo sharci, fadlan sharax sida qareenka uu kaaga qaatay lacagta/hantida aad adigu leedahay?

7. Cadeynta Khasaaraha

Waa inaad cadeysaa sida ay lacagta ama hantida aad rabto in lagu soo celiyo ay ku gashay gacanta qareenka. Tusaalooyin ah caddaynta khasaaraha waxaa ka mid ah (laakiin aan ku xaddidnayn) jeegagga la joojiyay, bayaanada dhaqdhaqaaqa akoonka

bangiga, rasiidhada, macluumaadka lacagta loo diray sida elektaroonigga ah, warqadaha lagu geliyo lacagaha akoonka, bayaanada kaarka kiridhitka, dukumeentiyada amaahda, dukumeentiyada qofka la wakiishay, dukumeentiyada lacagta lagu hayo, dukumeentiyada maxkamadda, iwm.

Ma bixisaa dukumentiyada orijinaalka haddii aad boostada ugu soo direyso xafiiska. Fadlan sharax caddeynta aad ku soo darayso.

8. Tallaabooyinka aad qaaday si aad u soo ceshato lacagta kaa maqan ka hor intaadan soo gudbinin sheegashadan

Ma dacwadaysay qareenka? Haddii ay haa tahay, nala wadaag lambarka kiiska:

Ma sameysay dacwad kale oo ka dhan ah hantida qareenka, sida sheegashooyinka caymiska, khilaafaadka khidmadaha, sheegashooyinka hantida, ama sheegashooyinka dhexdhexaadinta?

Ma kala xiriirtay hay'ad dembiyeed wax ku saabsan dacwad oogista suurtagalka ah?

Ma jirtaa cid aad kuu soo celisay ama kaa siisay magdhaw qayb kamid ah lacagtii kaa maqnayd (uu ku jiro qareenka)?

Fadlan nala wadaag nuqullada dukumeenti kasta oo la xiriira dadaallada kale ee aad qaaday si aad u soo ceshato lacagta kaa maqan

9. Dhibaato Gaar ah

Haddii aad aaminsan tahay in khasaaraha ku soo gaaray uu kuu keenay dhibaato gaar ah, fadlan sharax:

10. Dukumentiyada Taageeraya

Fadlan soo gudbi dukumeentiyo kasta oo taageeraya dacwadaada. Hubi inaad ku soo darto nuqulka heshiiskiina haddii aad mid haysatid, sidoo kale dukumentiyada si aad taageerto cadeynta in khasaare ku soo gaaray sida, jeegagii la siiyay qareenka, rashiidadii lacagta, bayaanada qulqulka akoonka bangiga ama dukumentiyada kale kuwaas oo cadeynaya lacagta la siiyay qareenka midaas oo uu si aan daacad ahayn uu ku qaatay. Haddii aad haysato dukumentiyada dheeraad ah oo aad u malaynayso inay ka caawin doonaan Guddiga inay fahmaan dacwaddaada, sida warqado, iimaylo, ama qoraallo adiga iyo qareenka idinka dhexeeya oo ku saabsan khasaarahaaga, waxaad sidoo kale soo diri kartaa dukumentiyadaas.

Fadlan boostada ugu soo dir foomka cabashada iyo dukumentiyada kale ee taageeraya:

Guddiga Amniga Macaamiilka
Minnesota Judicial Center, Suite 105
25 Rev. Dr. Martin Luther King Jr. Blvd.
St. Paul, MN 55155

Ama iimayl ugu soo dir:

csbgeneral@courts.state.mn.us

Markaan saxiixo foomkan, waxaan ka codsanayaa Guddiga Amniga Macaamiilka ee Minnesota inay i siiyaan lacagtii aan khasaaray sababtoo ah qareenkaygu wuxuu daacad darro ka ahaa Minnesota, ama sababtoo ah waxaan bixiyay lacag si qof kale iigu shaqaaleysiyo qareenkaas. Waxaan fahamsanahay lacag bixinta Guddiga ay tahay mid ikhtiyaari ah oo aan ahayn arrin xaq ah. Haddii aan helo abaalmarin, waan fahmayaa waana oggolahay inaan kaa caawiyo dhammaystirka dukumentiyada dheeraadka ah ee loo baahan yahay, waana ogahay in abaalmarinta aan la bixin doonin iyada oo aan la haysan dukumentiyada loo baahan yahay.

Waxaan ku cadeynaa ciqaabta been-abuurka in wax kasta oo aan ku sheegay dukumeentigan ay yihiin run iyo sax.

Saxiix

Taariikhda

Degmada

Gobalka